

Kiimiko isku daaweynta Kansarka

Cancer Chemotherapy

Chemotherapy, also called chemo, is medicines used to treat cancer. These medicines destroy cancer cells, keep them from growing and spreading, shrink the size of a tumor, or relieve cancer symptoms.

Depending on the type of cancer, chemotherapy medicine may be given:

- With other medicine
- Before or after surgery and/or radiation to shrink a tumor
- In cycles so that your body can rest and repair between treatments
- Throughout the body or directly into the site of the cancer
- In a vein called intravenous (IV) or as a pill, an injection, or cream
- In a hospital, doctor's office, or clinic

Your doctor will decide on the type of medicines and how often they are to be given.

Kiimiko isk daaweynta, oo sidoo kalena loo yaqaanno chemo, waa daawooyin loo isticmaalo daaweynta kansarka.

Daawooyinkaan waxay bur-buriyaan unugyada kansarka, waxay ka ilaaliyaan in ay koraan oo faafaan, waxay isku soo kaduudiyaaan cabbirka burada ama waxay yareeyaan calaamadaha kansarka.

Iyadoo ku xiran nooca kansarka, ayey daawada kiimiko isku daaweynta la isku siiyaa:

- Daawo kale
- Qalliinka ka hor ama ka dib iyo/ama shucaac si loo kaduudiyoo burada
- Wareegyo si markaas jidhkaagu uu u nasan karo isuna dayactiri karo inta u daaweynta u dhexeysa
- Jidhka oo dhan ama si toos ah meesha kansarku hayo
- Xidid loo yaqaanno xididada gudaha (IV) ama xidid gale ama sidii kaniini oo kale, looshan maqaarka ah ama labeen oo kale
- Isbitaalka gudihiisa, xafiiska takhtarka ama rugta caafimaadka

Takhtarkaaga ayaa go'aansan doona nooca daawooyinka iyo inta ugu badan ee ay tahay in la qaato.

Side Effects

Chemo can destroy or slow down the growth of normal cells, including cells of the hair, mouth, digestive system, and blood stream.

This can result in:

- Hair loss
- Mouth sores
- Nausea or vomiting
- Diarrhea
- Infections
- Tiredness
- Bleeding problems

You will be watched closely for side effects. Let your doctor or nurse know how you are feeling. Exams, blood tests, and medicines will be used to prevent or treat any side effects and check your condition.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

Saameynada liddiga ah

Chemo waxay bur-burin kartaa ama hoos u dhigi kartaa koritaanka unugyada caadiga ah, marka lagu daro unugyada timaha, afka, habka dheef shiidka, iyo marinka dhiigga.

Tani waxay keeni kartaa:

- Timaha oo buuba
- Af xanuun
- Lalabbo ama matagid
- Shubanka
- Jeermis jidhka gala
- Daalid
- Dhibaatooyin dhiig bixid

Waa lagaala socon doonaa wixii saameyno liddi ah. Takhtarkaaga ama kalkaalisada ogeysii sida aad dareemeysid. Baaritaanno, dhiig qaadid iyo daawooyin ayaa loo isticmaali doonaa si looga hortago ama loo daaweeyo saameynada liddiga ah loona hubiyo xaaladdaada.

La hadal dhaqtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama walaacyo.